

Hubaynta Little Warriors si ay uga Hortagaan xadgudubka galmada

Maayo 27, 2024 [Su'aalaha warbaahinta](#)

Dowladda Alberta waxay siinaysaa \$5 milyan Little Warriors saddexda sanno ee soo socota si ay ugu taageerto soo kabashada caruurta iyo dhalinyaradu kasoo kabanayaan xadgudubyada galmo ee ay kasoo badbaadeen.

Marna sax ma aha in canug ama da'yar waajaho dhibaatooyinka iyo saamaynta noloshiisa oo dhan ay ku yeelanayso xadgudubyada galmeed. Xaqiiqada jirta ayaa ah in mid kamid ah saddexdii qof ee reer Alberta ah uu waajahay xadgudub dhanka galmada ah intii uu ka yaraa da'da 18 sanno, waxaana kamid ah 44 boqolkiiba gabdhaha iyo 24 boqolkiiba wiilasha. Dhibaatooyinkan waxaa ka dhalan kara natiijoyin aan wanaagsanayn oo fara badan oo ay ka mid yihiin qalafsanaan, niyadjab, welwel, iswaxyeelayn iyo dhibaatooyinka uur-kutaaladu reebto (PTSD), waxayna saamaynahan xunxuni lasii socdaan qofka ilaa inta weynidiisa ayaga oo keena ina qofku yeesho balwad, xanuunada dhimirka iyo isdilka.

Dowladda Alberta waxay ku faanaysaa inay taageerto Little Warriors ayada oo xaqiijinaysa in caruur, dhalinyaro iyo qoysas fara badan ay helaan barnaamijyadeeda daawaynta dhibaatooyinka fajaca leh, daawoyinahaas oo caddaymo ku salaysan. Ayada oo maalagalintan la adeegsanayo, da'yarta ka badbaada waxay awoodi doonaan inay la tacaalaan ilaaliyaana badqabka dhimirkooda, dareenkooda iyo jirkoodaba si ay u bogsadaan una bararaan.

“Waa khatar ah in canug uu waajaho xadgudub galmo, laakiin waa inaysan noqon mid go'aamisa noloshiisa inta ka hadhay. Waxaan aad ugu mahadcelinayaa Little Warriors iyo dadaalkooda dhiiranaanta leh ee ay dhalinyarada badbaaday ee reer Alberta uga caawinayaan sidii ay uga bogsan lahaayeen dhibaatooyinka fajaca leh una soo ceshan lahaayeen sharaftooda.”

Searle Turton, Wasiirka Adeegyada Carruurta iyo Qoyska

Be Brave Ranch oo ay leedahay Little Warriors taasoo ku taala aagga Sherwood Park waa goobtii ugu horraysay ee bixisa daaweyn noocan ah waddanka. Goobtu waxay bixisaa tiro waxqabadyo ah oo goob kaamb ah oo kale lagu qabanayo, waxaana kamid ah baxnaano kooxeed iyo mid shakhsiyadeed,

lugaynta bii'ada dhexdeeda, waxqabadyo jimicsiyeed, farshaxan, baxnaanada dareenka iyo xayawaanka (sensory and animal therapy), iyo sidoo kale dhaqdhaqaaqyada maskax dajinta maalinlaha ah. Marka koowaad ee ay badbaadeyaashu yimaadaan, waxay marka koowaad dooranayaan maro gacanta lagu tolay oo badanaa ay ku qoranyihiin qoraalo dhiirigalin ah oo ka yimid qofka soo sameeyay. Dadkii dhawaan dhammaystay barnaamijka ayaa sidoo kale waraaqo u qora macaamiisha cusub – qoraalo caruurta iyo dhalinyaradu ayagu usoo diyaariyeen. Shaqooyinka kale – sida ka shaqaynta ulaha dagaalameyaasha – waxaa loogu tala galay inay badbaadeyaasha ka caawiyaan sidii ay aragtidooda u soo gudbin lahaayeen, una dareemi lahaayeen in la dhagaysanayo awood na la siinayo.

Little Warriors waxay sidoo kale bixiyaan hindisooyin waxbarasho, oo ay ka mid yihiin barnaamijyo caruurta iyo dhalinyarada looga caawinayo barashada samaysashada xaduudaha, aqbalaadda, iyo isdaryeelidda, iyo sidoo kale siminaarada loo yaqaano Kahortag! oo loola danleeyahay in dadka waaweyn laga caawiyo sidii ay uga hortagi lahaayeen ugana jawaabi lahaayeen xadgudubka galmada caruurta lagula kaco. Wuxuu ururku sida caadiga ah ku bixiyaa \$100,000 sannadkii cilmibaarista kaalmada ugu wanaagsan ee la siin karo caruurta iyo dhalinyarada ka badbaadda xadgudubka galmada wuxuuna ilaa iyo hadda soo daabacay sagaal cilmibaaris.

Xaqiiqooyinka kooban

- Dowladda Alberta \$10 milyan oo dheeraad ah siinaysaa xarumaha ku shaqada leh xadgudubka galmada saddexda sanno ee soo socota, waxaana iyadoo ay bixin doonto \$3 milyan sannadka 2024-25.
- Alberta waxay sidoo kale ku bixinaysaa \$3.4 milyan xarumaha u dooda caruurta, ee taageera caruurta iyo dhalinyarada nugul kuwaas oo la kulmay nooc walba oo xadgudub ah, oo uu ka mid yahay xadgudubka galmadu.

Macluumaadka la xidhiidha

- [Waa maxay xadgudubka, dayacaadda iyo ka faa'idaysiga galmeed ee caruurta](#)
- [Hel caawimaadda xadgudubka, dayacaadda iyo ka faa'idaysiga galmeed ee caruurta](#)
- [Sida gacan looga gaysto loona soo gudbiyo xadgudubka caruurta, dayacaadda iyo ka faa'idaysiga galmeed](#)

Wararka la xiriira

- [Xoojinta kaalmada dadka ka badbaada dhibaataada galmada | alberta.ca](#) (Aabriil 30, 2024)
- [Ka caawinta dhibaneyaasha faldanbiyeed sidii ay cadaalad uga raadsan lahaayeen nidaamka cadaaladda | alberta.ca](#) (Aabriil 5, 2024)

Warbaahinta kala duwan

- [Daawo war saxaafadeedka](#)
- [Caawimaad dheeraad ah oo loogu tala galay caruurta kasoo bogsanaysa xadgudubka galmada](#)

Su'aalaha warbaahinta

Ashli Barrett

587-545-8821

Xoghayaha Saxaafada, Adeegyada Carruurta iyo Qoyska